



## **Dugsiga Sarre ee Madison wuxuu aqoonsaday shaqada ay qabtaan Ururka aan Dawliga ahayn ee Horumarinta Shakhsigu Go'aansado Wuxuu Rabo(AVID)**

Dugsiga Saree ee Madison wuxuu noqday iskuulkii ugu horeeyey ee Dugsiyada Dadweynaha Portland ee loo qoondeeyo inay xarun u noqoto ururkan aan dawliga ahayn dadaalada ay ugu jiraan barnaamijyadooda u diyaarinaya ardayda sidii ay jaamacadaha u gali lahaayeen iyo wixii ka dambeeyaba.

AVID, waxa ay u taagan Horumarinta Shakhsigu Go'aansado Wuxuu Rabo, waana urur aan dawli ahayn kaasi" oo hawsha uu xooga saarayaa ay tahay sidii loo yarayn lahaa kala sareynta dhinaca guusha waxbarashada laga gaarayo iyada oo ardayda loo diyaarinayo sidii ay u tagi lahaayeen Jaamcadaha iyo fursadaha dugsiga sarre ka dambeeya." Waa barnaamijyo aya isticmaalaan 46 gobol iyo 17 wadan/dhulal kale oo xuduudahooda leh.

Haddaba iyada oo iskuulada iyo degmooyinku ay u isticmaalaan barnaamijka AVID mid la doorto, Dugsiga Sarre ee Madison wuxuu go'aansaday inuu isticmaalo barnaamijka AVID barnaamijyada guud ee iskuulka, kuwaasi oo waxbarasho ahaan looga qeybqaadanayo sidii loo horumarin laha diyaargarowga ardaydu sidii ay jaamacadaha inta ay joogaan iskuulka.

Wax ka yar boqolkiiba 10 (10%) oo ka mid ah Dugsiyada Dhexe iyo Dugsiyada Sarre ayaa ku guuleystay inay helaan mansabkaasi marka la eego dhammaan iskuuladeena oo dhan. Heerka aay ku guuleysteen waxa ay ku gaareen markii ururkani AVID helay xog xaqiijineysa madaxdooduna ay ku go'aan qaataan haddii ay buuxiyaan iskuuladaasi waxyaabaha ay shuruuda uga dhigaan inay ku sifoobaan.

Dugsigan Madison isticmaalkii uu isticmaalay AVID wuxuu ka caawiyey in boqolkiiba 76 ardayda ku jirta fasalka 12naad markii ay codseen jaamacadaha loo ogolaaday inay galaan jaamacada.